# Cawinaada turjumidda

SOMALISK

Waxaa helaysaa turjumid, hadii ay muhiim ku tahay baritaankaaga ama daaweentaada

Turjubaanimada waa lacag la´an, hadii aad daganeed Danmark in ka yar 3 sanadood

Waa inaad turjoobanimada iska bixiisid lacag, hadii aad daganeed Danmark in ka badan 3 sanadood.

## Qimaha

- Shaashad/ talefoon kusabsan socdaalka qofka bukaanka oo ku tagayo isbitalka, kulanka taqtarkaaga cadiga ah, iyo taqtarka gaarka ah. Qiimaha waa 191 karoon

- Turjumidda, oo turjubaanka goobjoog yahay, kusabsan socdaalka qofka bukaanka oo kutagayo isbitalka, Kulanka taqtarka cadiga ah, iyo taqtarka gaarka ah. Qiimaha waa 334 karoon

- Shaashad/talefoon marka bukaanka la dhigayo isbtalka: qiimaha waa 957 karoon.
Qiimaahaas waa wakhitiga oo dhan bukaanka isbilaatlka joogo.

- Turjumida, oo turjubaanka goobjoog yahay, marka bukaanka la dhigayo isbitalka: qiimaha waa 1675 karoon. Qimaahaas waa wakhtiga oo dhan bukaanka isbtitaalka joogo.

## Lacag la´an waaye marka

1) Buukanga oo awoodisa ama maskadiisa liidato, si ku meel gaar ama ku raagta weligiis, kana luuntay awooda barashada luugada danishka.
2) Ciyaalka, la daaweenaayo ayaga oo waalidka la socon.
3) Waalidka u baahan turjubaan marka ciyaalka la daaweenaayo
4) Dadka tirada yar ka soo jeeda jarmalka dagan danmark oo u baahan turjubaan ku saabsan luqada jarmalka.

Waa lacag laán turjumidda dadka ka soo jeeda Jasiirooyinka Greenland iyo faroe islands

Haddii lagaa dhaafo qodobka 1, waa inaad dirtaa dukumeentiyo qoraal ah kusaabsan qodbka 1. gobolka aad ku nooshahay (eeg ciwaanka hoose). Dukumeentiyadu waa inay ahaadaan qoraal uu soo saaray dhakhtar. Tusaale ahaan, waxay noqon kartaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka kugu daaweynaya isbitaalka.

## Bixinta

Haddii aad bixineysid lacagta, waxaad ka heli doontaa qaansheegta gobolka aad degntahay.
Bixinta lacagta waxaad ka heli kartaa e-bokskaaga ama boostada caadiga ah.

## Talo iyo Cabashooyin

Hadii aad u baahantahay Macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada ama cabashooyinka qofka bukaanka la xiriir lataliyayaasha bukaanka ee gobolka aad degntahay.